



# It's Up to Us®

si loo abuuro San Diego Caafimaad iyo Taageero leh

Maqaal gaar ah oo khuseeya mawduucyada caafimaadka dhimirka ee dadka reer San Diego



Daabacaadda 37

## Xog ku saabsan Maqaalka

Daawashada qofka qoyskaaga ah oo dhibtoonaaya marna maaha wax sahlen. Haddii saaxiib, qof qoyska ah, daris, ama qof kula shaqeyya uu haba yaraatee waajahaayo dhibaataada caafimaadka dhimirka, deroogada, ama khamriga la xiriira, tilmaantaan ayaa kaa caawinaysa barashada talaabooyinka aad qaadi karto si aad u taageerto qofka.

Maqaalkaan wuxuu qayb ka yahay ol-olaha *It's Up to Us* (Waa Hawl Na Wada Qusaysa), oo lagu abuuray County of San Diego Health and Human Services Agency (Wakaaladaha Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada ee San Diego) wuxuna taageerayaa higsiga degmada ee *Live Well San Diego* si loo hormariyo bulsho caafimaad qabta, badqab leh, oo kobcaysa. Ayadoo kor loo qaadaayo wacyi gelinta, lana dhiiri gelinaayo wada hadalka, lana bixinaayo helitaanka khayraadka maxaliga ah, waxaan doonaynaa inaan kobcino faya qabka, oo aan yarayno takorka, aana kahortagno isdilka dhammaan dadka San Diego, anagoo muhiimad gaar ah saarayna bulshooyinku San Diego ee saamaynta ugu xun ku dhacday iyo kuwa khatarta ugu badan ku jira.



Iskaanka mari si aad u akhriso tilmaamaha dheeriga ah ee bulshada.

## Up2SD.org®

LINK UP FOR INFORMATION AND MENTAL HEALTH RESOURCES

Laynka Helitaanka Gurmadka iyo Masiibada

**888-724-7240**

Laynka Gudmadka Isdilka iyo Masiibada ee Qaran

**988**

Ilaha Khayraadka Bulshada

**211**

## Iftiimin: Fahanka Dhibaatooyinka Caafimaadka dhimirka, Dhibaatooyinka Daroogada, ama Khamriga la xiriira

Haddii ay timaado xaalad degdeg ah oo la xiriirta caafimaadka dhimirka ama isticmaalka maandooriyaha, waxaa jira adeegyo la heli karo oo ka caawinaaya dadka inay ku xirnaadaa taageero xirfadeed. Adeegyada caawimaada iyo gurmadka masibada ayaa kaa caawinaaya xaqijintaa in shaqaalaha gurmadka degdega ah iyo booliiska keliya la waco marka ay jiraan xaalado u baahan gurmad degdeg ah.

Xaaladaha degdega ah caafimaadka dhimirka iyo isticmaalka maandooriyaasha la xiriira, oo sidoo kale loo yaqaano xaaladaha degdega ah ee caafimaadka dhimirka ama masiiboooyinka caafimaadka dhimirka, waa xaaladaha ficiilada, dareennada, ama habdhqaannada qofku ay keeni karaan inuu waxyeelo u gaysto naftiisa ama dadka kale, ama ku adkaynaysa inuu daryeelo dadka kale. Xaaladaha noocaan ah ayaa badanaa la xiriira dareennada hooy la'aanta ama caawimaad la'aanta kuwaasoo keena in qofku iska badiyo khamriga ama deroogada. Haddii qof aad ka naxayso uu ku jiro dhibaato sidaan oo kale ah, waa muhiim inaad taqaano sida aad ugu heli karto taageerada uu u baahan yahay.

## 4 Adeeg oo Muhiim ay tahay Inaad Ogaato

**Laynka Helitaanka Gurmadka iyo Masiibada ee San Diego (ACL) 888-724-7240** Haddii aad u baahan tahay xog ama in lagaa caawiyo helitaanka ilaha adeegyada, laynkaan ayaa ah meel wanaagsan oo aad ka bilaabi karto. Kuwaani waa adeegyada kale ee hoos ku qoran kuwaasoo aad la xiriiri karto ayagana. Wuxaad wici kartaa ACL haddii aad doonayso inaad xog ka hesho barnaamijiyada, taageero naftaada ah, ama in lagugu xiro taqasusle.

**Xarumaha Xasilinta Xaaladaha dhibaatooyinka ah** Kuwaani waa xarumo ku yaala deegaanka sidoo kalena u dhow ama ku dhix yaala isbitaallo kala duwan oo ku yaala Ismaamulka San Diego. Xarumahaan waxaa loo sameeyay inay adeegyada gurmadka siyyaan dadka dhibaatadu haysato.

**Adeegyada Bukaan Socodka** Adeegyadaan waxaa baxsha xarumaha caafimaadka dhimirka ee Ismaamulka San Diego iyo xarumaha kale. Waxay balan u qabtaan dadka qaba xanuunnada caafimaadka dhimirka ama isticmaalka Maandooriyaasha waxayna aqbali karaan balamaha degdega ah ee tooska loo yimaado.

**Adeegyada Ka jawaabidda Dhibaatooyinka** Marka aad wacdo ACL, shaqaalaha taleefanka oo tababarayaa ka jawaabi doona wicitaankaaga kadibna wax kaa waydiin doona dhibka aad qabto. Ayadoo lagu saleynayo jawaabahaaga, shaqaalaha taleefanka ayaa go'aamin doona haddii adeegyada caawimaada iyo gurmadka gaarka ah ay tahay in laguu diro, sida Shaqaalaha Gurmadka Masiibada ee Wareega (MCRT) ama adeegyada xaaladaha degdega ah.

# Akhri: Barnaamijka Shaqaalaha Gurmadka Masiibada ee Wareega (MCRT)

Shaqaalaha Gurmadka Masiibada ee Wareega (MCRT) waa adeegga gurmadka masiibada oo laga furay Ismamaulka San Diego bishii Janaayo 2021. Kooxda MCRT waxay ka jawaabaan, qiiameyaan, ayna dejiyaan xaalada dhibaatada leh wuxaan la diri karaa marka xubin kamid ah bulshadu lasoo xiriirto ACL ama adeegyada Degdega ah.,

Hal wax oo barnaamijkaan kaga duwan yahay kooxaha kale gurmadka masiibada sida Kooxda Gurmadka Xaalada Degdega ah ee Caafimaadka Dhimirka (PERT) waa in kooxda MCRT aysan qayb ka ahayn booliska. Waxay siiyaan dookha gaarka ah ee gurmadka masiibada dadka reer San Diego ee qaba dhibaatada caafimaadka dhimirka ama isticmaalka maandooriyaasha la xiriirta. Kooxaha waxaa ku jira dhakhtar u tababaray dhimirka, maareeyaha kiiska, iyo shaqaalaha taageerada oo soo maray isla xaalada bukaanku qabo. MCRT ayaa gacan ka gaysan kara xaaladaha u baahan buuxinta shuruudo gaar ah, sida marka aysan jirin khataro ama rabshad ama xaalado degdeg ah oo caafimaad (hoos ka akhri xog dheeraad ah). Adeegyadaan waxaa loo sameeyay inay ugu tagaan qofka "meesha uu joogo" qaab caawimaad iyo qadarin leh.

MCRT yada ayaa imamaaya kaana caawinaaya inaad fahanto Aadna dejiso xaalada. Waxey kuu sharxi doonaan dookhyadaada waxeyna ku talin doonaan waxa aad samayn karto talaabada xigta. Haddii aad u baahan tahay, waxey sidoo kale kuu fidin karaan gaari ku geeya meel aad ka helaysa caawimaad dherei ah. **Yoolkoodu** waa inay kaa caawiyaa helitaanka taageerada ugu fiican ee buuxinaya baahiyahaaga.

## Maxay Adeegyada Caawimaadka iyo Gurmadka Masiibadu Baxshaan?

**MCRT** Kooxda ka baxsan booliska



**PERT** Booliska + shaqaale caafimaad



**EMS** Haddii ay jirto xaalad caafimaad oo degdeg ah



Ayadoo ku xiran xaalada, adeegyada gurmadka masiibada oo dheeraad ah ayaa la diri karaa.

## MCRT yada ayaa Ku caawin Kara Marka ...

1. Aadan qabin wax dhaawacyo ah oo u baahan gurmadi caafimaad.
2. Uusan jirin hub aad ku lug leedahay ama la ogyahay inaad haysato hub.
3. Qofku uusan qayb ka ahayn fal danbiyeed xun oo qayb ka ah baahida loo qabo gurmadi qasab ka dhigaaya in booliska loogu yeero.
4. Qofka aan lagu ogay inuu ku jiray baaritaan ay ku wadeen ciidanka boolisku.
5. Aysan jirin khatarta rabshad ama inay dhacdo rabshad degdeg ah ama adeegsiga dagaal ka dhan ah naftiisa ama dadka kale.

Haddii ciidanka booliska aan si gaar ah loo codsan IYO dhammaan shuruudaha kale ee kor ku qorana la buuxsho, shaqaalaha wicitaanka ayaa ku talin kara in MCRT loo diro si uu ugu gurmado dhibaatada.

Haddii aadan wali hubin waxa aad samaynayso ama u baahan tahay, wac **ACL 888-724-7240** si aad ula hadasho khabir tababaray. Si aad xog badan uga ogaato adeegyadaan, booqo sandiegocounty.gov/mcrt/ iyo comresearch.org/pert.php.

## ILAHA

Ismaamulka San Diego. (n.d.). *Xog ku saabsan kooxaha gurmadka masiibada ee wareega (MCRT)*. [https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/BHS\\_MCRT/About\\_MCRT.html](https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/BHS_MCRT/About_MCRT.html)

Ismaamulka San Diego. (2022 , Nufeembar 16). *Su'aalah marwaliba Leys Weydiyo ee ku saabsan MCRT*. [https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/BHS\\_MCRT/BHS\\_MCRT\\_FAQs.html](https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/BHS_MCRT/BHS_MCRT_FAQs.html)

Isbahaysiga Qaran ee Xanuunka Dhimirka, San Diego iyo Ismaamullada Imperial. (2022). *Kooxda Gurmadka Xaalada Degdega ah ee dhimirka (PERT)*. [https://sandiego.networkofcare.org/mh/services/agency.aspx?pid=PsychiatricEmergencyResponseTeamPERT\\_61\\_2\\_0](https://sandiego.networkofcare.org/mh/services/agency.aspx?pid=PsychiatricEmergencyResponseTeamPERT_61_2_0)

Ismaamulka San Diego. (n.d.). *P.E.R.T. Kooxda gurmadka Xaalada Degdega ah ee dhimirka, xogta bulshada, barashada iyo taariikhda PERT*. [https://www.sandiegocounty.gov/content/dam/sdc/hhsa/programs/bhs/documents/pert\\_flyer.pdf](https://www.sandiegocounty.gov/content/dam/sdc/hhsa/programs/bhs/documents/pert_flyer.pdf)

Haayada Cilmi Baarista Bulshada (2010). *Kooxda gurmadka Xaalada Degdega ah ee dhimirka*. <http://www.comresearch.org/pert.php>